

Pyrazinamide (PZA)

Somali



Buugga tilmaamaha dawooyinka (TB da)

Waa maxay Pyrazinamide?

Pyrazinamide (PZA) waa dawo antibiotic ah ee lagu daweyo cudurka qaaxada (TB). Laba siyaalod ayaa loo isticmaalaa:

1. In lagu dilo jeermiga hurda ee TB da
2. In lagu dilo jeermiga TB da ee cudurka keena (marka lala qaato dawooyin kale)

Jeermiga TB da waa mid dhib badan sida loo daweyana adagtahay. Waa in aad qaadataa dawadan mudo laba billood iyo ka badan si loo cirib tiro jeermiga TB da. Takhtarkaada ayaa go'aaminaayo inta billod aad qaadanaysid dawada.

Sidee baan u qaataa dawadan?

- Waa muhim in aad maalin kasta qaadatid dawada **ama** sida uu takhtarkaada ku faray
- **Isla markiiba ogeysii takhtarkaada marka aad joojisid qaadashada dawada**
- Hadii aad ilowdo qaadashada qeyb (in hal mar la qaato) oo dawo ah, u qaado sida ugu dhaqsiyaha badan, marna ha isku wada qaadan laba qeyb oo daawo ah, hal mar
- Isku day in aad qaadatid dawada adoo gaajeysan. Hadii ay kaa dhibto caloosha ku qaado cunto
- La socodsii takhtarkaada dawooyinka kale ee aad qaadatid ama kuwa aad hadda bilowday
- Hadii aad xaamilo tahay ama aad ilmo nuujinaysid la tasho takhtarkaada inta aadan qaadan dawadan
- Ku keydi dawada PZA da meel qabow ee qalalan

HA CABIN QAMRO inta aad qaadanaysid dawadan. Waxaad dhaawici kartaa beerkaada.

Dadka intiisa badan waxay dawadan qaataan labada billood ee ugu horeya oo keliya. Muddan gudaheeda waxaa laga yaaba in loo baahdo in la qaato kaniiniga hal, laba ama saddex jeer maalinkii ba, waa hadba sida uu takhtarku ku faro.

Waa kuwee calaamooyinka aan iska jiraayo?

- Dadka intiisa badan dhibaato kalama kulmaan dawadan PZA da
- Waxaad u baahantahay in uu takhtarkaadu si joogta ah kuula socdo inta aad qaadanaysid dawada PZA da
- **Calaamadaha caadi ga ah ee leysku arko waxaa ka mid ah:**
 - Calool xanuun yar yar/Raashiin xumo
 - Barar ama kala-goysyada xubnaha oo ku xanuuna
 - Nabro yar yar oo jirka ka soo yaaca
 - Cad ceeda oo qofka dhibta
- **Hadii aad isku aragtid calaamadahan qaarkood ee qatarta ah, jooji dawada takhtarkana la xiriir**
 - Caajis/daal fara badan
 - Labbo-labbo/ matag
 - Calool xanuun
 - Raashiin xumo
 - Jirka ama indhaha oo huruud kaa noqda
 - Kaadi aad u magdi ah
 - saddex cisho ama ka badan oo qandho ku qabata

Habka dawada TB da loo qaato

- Qaado dawada waqti go'an maalin kasta, sida:
 - Inta aadan jiifsan
 - Marka ugu horeeysa ee aad hurdada ka kacdid
- Isticmaal gasaca lagu qeybiyodaawada oo todobaadle ah
- Maalin kasta ee aad qaadatid kaniiniga ku calaamadeyso buuga jadwalka taariikhda
- Weydiiso qof goyska ka mid ah ama saaxibkaa in uu ku xasuusiyo
- Tix gelin sii in aad raacdid barnaamijka Hubinta Qaadashada Dawada (DOT)

Hadii aad wax su'aal ah ka qabtid dawooyinkaada ama TB daba fadhlan la xiriir takhtarkaada ama Toronto Public Health oo laga helo **416-338-7600**

E-mail: targettb@toronto.ca

Web site: www.toronto.ca/health/tb_prevention

